Salaam,

Ku Soo Dhawoow Dheefaha Horumarinta Degdegga ah ee Hore iyo Wax-ka-qabadka Hab-dhaqanka (EIDBI). Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota waxay rabtaa inay hubiso inaad ka warqabto habka, agabka iyo erey-bixinta guud ee badanaa barnaamijku adeegsado. Waxaan rabnaa inaad ku dareento kalsooni iyo raaxo-lahaansho adeegyada ilmahaaga.

Warqadani waxay adiga kuu guudmari doontaa aasaasiyaadka EIDBI. Laakiin, haddii aad rabto inaad wax badan ka barato tan, waxaad qaadan kartaa tababarkanaga EIDBI ee onlaynka ah. Waxay qaadataa ilaa hal saac in la dhammaystiro.

Shaxanka1: Talaabooyinka lagu helo adeegyada EIDBI



Ujeedada adeegyada EIDBI

Ujeedada adeegyada EIDBI waa in laga caawiyo carruurta qaba ootisamka iyo xaaladaha la xiriira inay kordhiyaan xirfadahooda. Tan waxaa ku jira xirfadaha:

- Wada xiriirka
- La falgalka dadka kale
- Dhisidda madax-banaanida is-daryeelidda iyo qabsashada hawlaha nolol maalmeedka
- Kordhinta ka qeybqaadashada guriga iyo bulshada.

Sharciga ayaa uga baahan in adeegyada EIDBI ay ahaadaan kuwo qofka iyo qoyska ay xuddun u yihiin. Tani waxay ka dhigan tahay in adeegyadu ay isku dheelitiri doonaan waxa U FIICAN ilmahaaga/qoyskaaga iyo waxa muhiimka u AH ilmahaaga/qoyskaaga. Sidaa darteed, adeegyadu waa inay ka tarjumaan baahiyahaaga, danahaaga, qiyamkaaga, asal dhaqameedkaaga iyo natiijooyinka aad doorbidayso. Si taas loo gaaro, adiga iyo ilmahaagu ayaa hagi doona qorsheynta iyo hirgelinta adeegga.

Waa muhiim in la ogaado in adeegyada EIDBI ay yihiin kuwo caddayn ku salaysan, taas oo macnaheedu yahay in kaliya hababka daawaynta ee badqabka iyo waxtarka leh la bixin karo.

Qiimayn dhamaystiran

Si loo bilaabo adeegyada EIDBI, ilmahaagu waa inuu dhamaystiraa Qiimaynta Takhasuska Kala-duwan ee Dhameystiran (CMDE). CMDE waxay kaa caawin doontaa go'aaminta u-qalmitaanka iyo baahida caafimaad ee adeegyada. Bixiyahaaga CMDE ayaa dhamaystiri doona u kuur-galka ilmahaaga, ururin doona macluumaad oo dib kuula eegi doonaa natiijada marka la dhammeeyo. Haddii ilmahaagu uu hore u lahaa baaritaan caafimaad, bixiyaha ayaa xaqiijin doona baaritaanka oo soo jeedin doona inta saacadood ee adeegga ee lagu talinayo iyadoo ku saleysan heerka taageerada loo baahan yahay. Haddii ilmahaagu aanu weli helin baaritaan caafimaad, bixiyaha CMDE ayaa go'aamin doona haddii ilmahaagu buuxiyo shuruudaha ootisamka ama xaalad la xiriirta. Qiimaynta ayaa sidoo kale kaa caawin doonta in la go'aamiyo nooca goobta ka caawin karta cunuga inuu yeesho xirfadaha iyo hadafyada muhiimka u ah qoyskaaga.

Kahor intaadan sii wadin qorshaha daawaynta, waa inaad saxiixdo qorshaha qiimaynta si aad u muujiso inaad:

1. Xog-ogaal u tahay qorshaha
2. Ogoshahay talooyinka lagu soo jeediyay warbixinta.

Qiimaynta waa in la cusboonaysiiyaa saddexdii sanoba mar, ilaa aad adiga xilligaa kahor codsato mooyaane ama ay jirto sabab caafimaad oo sidaas loo sameeyo (sida isbeddel weyn oo canugaaga ama qoyskaaga ku yimaado).

Waxaad dooran kartaa bixiyahaaga CMDE. Qasab ma aha inuu ahaado isla wakaaladda ilmahaagu ka heli doono wax-ka-qabadyada.

Haddii aad ka hesho CMDE bixiye dibadda ah, waxaa laga yaabaa inaad doonto inaad la shaqeyso maamulaha kiiskaaga si aad u aqoonsato wakaaladda EIDBI ama aad weydiisato bixiyaha CMDE gudbin. Waxaad sidoo kale adeegsan kartaa Agabka tubta gudbinta EIDBI si aad iskaa ugu xulato wakaalad.

Qorshaha daawaynta

Si loo sameeyo qorshe daaweyn, wakaaladda bixiyayaasha EIDBI waxay adeegsan doontaa wax la yiraahdo Qorshaha Daaweynta Shakhsiyeed (ITP). Wakaaladda bixiyayaasha ayaa hogaamin doonta habraaca horumarinta ITP, laakiin waxay ku salaysnaan doontaa qiimayno, waraysiyo iyo indho-indhayn lala yeesho adiga iyo ilmahaaga. Talooyinka iyo yoolalka qoran waa in ay ka tarjumayaan hab-dhaqanka, qiyamka, mudnaanta iyo dookhyada qoyskaaga.

Marka qorshaha la dhammaystiro, waxaa lagu weydiin doonaa inaad saxiixdo. Tani waxay caddayn u noqon doontaa inaad dib-u-eegtay oo aad oggolaatay. Waxaad ku saxiixi kartaa kulanka ama waxaad qaadan kartaa waqti aad dib ugu eegto, laakiin daaweyntu ma bilaaban karto mana sii socon karto ilaa aad saxiixdo qorshaha.

Qorshaha waxaa la cusboonaysiin doonaa lixdii biloodba mar, ama in ka badan ayaa la cusboonaysiin karaa haddii loo baahdo.

Xuquuqaha iyo masuuliyadaha

Bixiyuhu wuxuu sidoo kale ku weydiin doonaa inaad dib u eegto labadaba xuquuqda iyo waajibaadka ee adiga ama bixiyaha adigoo wadaagaya dukumentiyadan:

- EIDBI: Xuquuqdaada iyo Mas'uuliyadahaaga, DHS-7645A (PDF)
- EIDBI: Mas'uuliyadaha Wakaalada Bixiyaha, DHS-7645B (PDF)

(Fiiro Gaar ah: Labadan dukumeenti waxaa lagu heli karaa luqado kale, sidoo kale. Tag bogga hore ee eDocs oo raadi "7645." Waxay kuu soo saari doontaa liiska noocyo la turjumay.)

Dukumeentiyadani waxay qeexayaan xuquuqahaaga ka qaybqaataha dheefaha EIDBI ahaan, xuquuqahaaga rafcaanka, habka loo gudbiyo cabasho iyo wax ka badan. Wakaaladda bixiyaha EIDBI waa in ay dib kuula eegaan macluumaadkan inta lagu jiro habka qorshaynta daaweynta iyo ugu yaraan sannad kasta markaa kadib.

Shirka daryeelka isku-dubaridan

Bixiyahaagu waxa kale oo laga yaabaa inuu jadwaleeyo shirka daryeelka isku-dubaridan si dib loogu eego qorshaha daawaynta. Tani waa fursad aad dib ugu wada eegtaan qorshaha oo aad ku waydiin karto su'aal kasta oo aad qabtid. Tani sidoo kale waa fursad aad kula kulanto bixiyaasha kale ama xirfadlayaasha ka tirsan kooxda ilmahaaga. Kuwa waxaa ka mid ahaan kara macalimiin, dhakhaatiirta hadalka/luuqadda, terabiyaasha shaqada, maamulayaasha kiiska ama cid kasta oo kale oo aad codsato. Waxaad codsan kartaa shirarka daryeelka isku-dubaridan wakhti kasta inta lagu jiro adeegyada ilmahaaga.

Kooxda bixiyayaasha

Kooxda EIDBI ee ilmahaaga waxa ka mid ahaan doona dad kala duwan. Xirfadlaha kormeeridda ee shahaadaysan (QSP) waa xirfadle shatiyaysan oo kormeeri doona adeegyada la siiyo ilmahaaga. Waxay sidoo kale dib-u-eegi doonaan/saxiixi doonaan ITP-ga ilmahaaga. Ilmahaagu waxa kale oo uu yeelan doonaa bixiyeyaal kale kuwaas oo raaci doona yoolalka lagu qeexay ITP oo siin doona taageero qaab fool-ka-fool ama koox yar ah. Waxaad xaq u leedahay inaad wax ka waydiiso shahaadooyinka iyo khibradda shaqaalaha la shaqaynaya ilmahaaga.

Macluumaad dheeraad ah

Tani waa warbixin kooban oo ku saabsan habraaca EIDBI. Si aad u hesho liiska agabyo badan, aad Bogga Kheyraadka Ootiisamka Minnesota. Waxaad sidoo kale baaran kartaa eray-bixinta EIDBI si aad u hesho micnaha ereyo gaar ah. Haddii aad qabto su'aalo kale ama aad rabto inaad wax badan ogaato, ha ka waaban inaad iimayl u dirto Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota Kooxda EIDBI ASD.DHS@state.mn.us.

Mahadsanid,

Kooxda EIDBI ee Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota